



## Bisha Febraayo 5teeda ilaa 9keeda waxaa loo asteeeyey inay noqotay Todobaadka Qaran ee La-taliyaasha Iskuulada

Todobaadkani waa todobaadkii Qaran ee La-taliyaasha iskuulada. Taasi oo shamac ku shidaysa sidii ay banka u soo dhigi lahayd caawimada ay ka geystaan la -taliyaashaasi iskuulada wadanka oo dhan. Ururka La-taliyaasha Iskuulada Maraykan waxaa loo asteeeyey bisha Febraayo 5ta ilaa 9keeda in loo aqoonsado hawlaha shaqo ee la-taliyaashu ku caawiyaan ardaydu sidii ay ugu guuleysan lahayd iskuulada iyo waliba sidii ay u qorsheyn lahaayeen mustaqballoodha shaqo.

Marka la eego ururka ASCA, waxaa ka qeybqaadanaya in ka badan 100,000 oo la-taliye iskuulada Maraykan ka kooban hawlaha todobaadka iyaga oo martigalinaya munaasabado gaar ah iyo hawlo dareenka ku soo jeedinayo faa'iidooyinka in la sameeyo barnaamij dhammeystiran la-talinta ah.

"La-taliyaasha iskuuladu waxa ay ka shaqeeyaan sidii ay meesha uga saari lahaayeen caqabadaha ardayda ka hor istaaga sidii ay wax u baran lahayn iyaga oo ka hadlaya dareenada waxbarashadooda, in lagu wacyi galiyo xirfadaha shaqo ee ay tahay inay ka fikiraan marka ay dhameeyaan iskuulka iyo xirfadaha bulsho/shucuureed," ayey tiri Kwok-Sze Wong, Madaxa Guud ee Ururka ASCA. "Barnaamijada la-taliyaasha ee dhammeystiran wax ay caawiyaan sidii ay u kordhin lahaayeen guusha ardayda iyaga oo siinaya agabyadii ay u baahnaayeen ardaydu, macalimiintu iyo maamulkuba. La-taliyaasha iskuuladu waxa ay muhiim u yihiin guusha ardayda."

Si aad wax badan uga ogato oo ku saabsan ururka ASCA, waxaa firisaa shabakada ururka ee [organization's website](#).